*Taxanaha:*
DHIGAALO DIINEED
5

# 10-ka XEER

# EE DAAHIRINTA NAFTA

Sh. Dr. Cabdirisaaq al-Badar

*Turjume:*

Cabdishakuur Sh. Xasan Ibraahin

RUGTA WEGEN

TAXANAHA DHIGAALO
DIINEED Q.1AAD

© Cabdishakuur Sh. Xasan

*Tafatirayaasha:*
Sahal X. Maxamuud —Saylaci
Cabdirisaaq Cali Maxamed
Maxamed Saalax Xasan

*Nashqadeynta, qaabeynta jaldiga iyo quraaridda buugga:*
Cabdirisaaq —Abu Cubeyda
Cabdiraxman Sh. Xasan

@RugtaWegen

# TUSMADA BUUGGA:

**MAHADNAQ** .......... **5**

**HORDHACA QORAAGA** .......... 7

**QAACIDADA KOOBAAD** .......... **1**

***Tawxiidku waa sawraca/asalka daahirinta nafta.*** .......... 1

**QAACIDADA LABAAD** .......... **6**

***Ducadu waa furaha nafta lagu daahiriyo.*** .......... 6

**QAACIDADA SADDEXAAD** .......... **10**

***Qur'aanku waa isha dahaarada nafta iyo caawiyaheeda*** .......... 10

**QAACIDADA AFRAAD** .......... **12**

***Samaysashada hoggaan iyo cid aad ku dayato.*** .......... 12

**QAACIDADA SHANAAD** .......... **15**

**QAACIDADA LIXAAD** .......... **17**

***Xidhidda daaqadaha ka saaraya nafta dahaarada, kana fogaynaya wanaagga,*** .......... 17

***kuna ridaya meelaha liita.*** .......... 17

**QAACIDADA TODDOBAAD** .......... **20**

***Xasuusashada geerida iyo la kulanka ILAAHAY.*** .......... 20

**QAACIDADA SIDDEEDAAD** .......... **23**

***Doorashada fadhiga wanaagsan iyo xulashada saaxiibka fiican.*** .......... 23

QAACIDADA SAGAALAAD .......... 25

***Ka digtoonaanta is-cajabinta iyo ku kadsoomidda Nafta.*** .......... 25

**QAACIDADA TOBNAAD** .......... **27**

***Aqoonsiga Nafta*** .......... 27

**GUNTII IYO GEBAGEBADII** .......... **32**

# MAHADNAQ

Ugu horreyn, mahad oo dhami waxa ay u sugnaatay ALLAH weyn ee suura galiyey in uu soo baxo dhiganahan. Akhriste waxa aad maanta gacantaada ku haysaa natiijada dedaalka naf hurka ah iyo wax soo saarka ay iska kaashadeen dhinacyo kala duwan, kaas oo loogu magac daray "Tobanka xeer ee daahirinta nafta". Waxaan si buuxda ula socdaa in guul sidan oo kale ah aan la gaadhi lahayn haddii aan la isku darin dedaallo ay dad sharaf leh siyaabo kala duwan uga qayb qaateen. Sidii looga midho dhalinlahaa natijadan quruxda badan. Waxaan mahad iyo bogaadin aan la soo koobi karin u soo jeedinayaa cid kasta oo gacan ka gaysatay dhamaystirka buuggan, oo ay ugu horreeyaan tifaftirayaasha sharafta leh ee dedaalka dheer u galay dib u eegista qoraallada, iyo sixidda khaladaadka afka iyo naxwahaba leh. Talooyin wax ku ool ah ku daray hodannimada garaadka iyo farshaxanka buugga.Waxa aan dhammaantiin idiinka mahadnaqayaa garab-istaaggii iyo wada-shaqayntiina, wakhti iyo dadaalba aad ku bixiseen sidii buuggan tixraac muhim ah ugu noqon lahaa dhinaca aqoonta diiniga ah. Waxaan garowsanahay milgaha aad iga mudantihiin in uu weyn yahay, dadaalkiinuna uu yahay mid aan la illaawi karin.

Aniga oo aan kala qaadqaadin, dhammaantiin waad mahadsan tihiin. Waxa aan rajaynayaa in uu buuggani noqdo mid wax badan kusoo kordhiya maktabadda soomaalida, kana qayb qaadan doono faafinta wacyiga diineed ee bulshada. Waxa aan si gaar ah ugu mahadnaqayaa:

**Tafatirayaasha**:
Sahal  maxamuud Cilmi
Cabdirisaq Cali Maxamed
Mohamed saalah hassan

**Qaabayn Iyo Qurxin:**
Abdirahman sh. Hassan
Abdirisaaq Ismaaciil Cabdi (Abu-Cubayda)

# HORDHACA QORAAGA

ILAAHAY ayaa mahad oo dhan iska leh, nabad gelyo iyo ammaani korkiisa ha ahaato Nebigii ugu sharafta badnaa, uguna dambeeyey Rasuushii RABBI soo diray. Nebigeennii, hoggaankeennii, il- qabowsigeennii, hanuuniyaheennii, iyo kii ammaanada ku suntanaa ee Muxammed ahaa. Sidoo kale saxaabadiisi iyo ehelkiisiba nabad gelyo korkooda ha ahaato iyo cid kasta oo dariiqoodi qaadda ilaa Qiyaamaha.

Intaa ka dib, nafta ku sugan gudaha jidhka aadanahu waa mid uu arrinkeedu weyn yahay. ALLAAH-na waxa uu ku dhaartay in badan oo ka mid ah waxyaalaha uu abuuray kuwooda ugu waaweyn ee ku tusinaya weynidiisa, sida ku cad Suuratu Al-shamsi, marka uu ka warramayo nafta guuleysatay iyo ta guul- darraysatay. ALLE waxa uu yidhi:

{ وَالشَّمْسِ وَضُحَاهَا (1) وَالْقَمَرِ إِذَا تَلَاهَا (2) وَالنَّهَارِ إِذَا جَلَّاهَا (3) وَاللَّيْلِ إِذَا يَغْشَاهَا (4) وَالسَّمَاءِ وَمَا بَنَاهَا (5) وَالْأَرْضِ وَمَا طَحَاهَا (6) وَنَفْسٍ وَمَا سَوَّاهَا (7) فَأَلْهَمَهَا فُجُورَهَا وَتَقْوَاهَا (8) قَدْ أَفْلَحَ مَن زَكَّاهَا (9) وَقَدْ خَابَ مَن دَسَّاهَا }

Hadalka uu ALLE yidhi —isaga ayaa xumaan ka hufane—: (قَدْ أَفْلَحَ مَن زَكَّاهَ ) ereyga "sakaa" (dahirnaan/Maydhnaan) asal ahaan waxa weeye: korodhka khayrka iyo wanaagga. Ujeeddaduna waa: Qofka u-orda hagaajinta naftiisa, hufiddeeda, sarreynta ay ku sarreyso farabadsiga khayraadka iyo cibaadada, ka dheeraanta sharka iyo xumaanta ayaa ay ku xaqiiqoobaysa guusheedu.

Hadalka uu ALLE SW yidhi: {وَقَدْ خَابَ مَن دَسَّاهَ ) ereyga "tadsiya" asal ahaan waa qarinta. Qofka caasiga ah (amarka RABBI khilaafay)

waxa uu ku qariyey naftiisii wanaagsaneyd sameynta dambiyada, -Waxa uu ku aasay waxyaalo liita iyo qudhun,  waxa uu gunta u-dhigay oo uu ku halaagay samaynta Ceebta, ilaa ay noqotay naftiisi mid hoosaysa, liidata oo xun. Sidaasna waxa ay ku mutaysatay hoog iyo khasaare ALLE ayeynu ka magan galnee.

Nafaha wanaagsani waxa ay ku raalli noqdaan meelaha sarreeya, qiimaha badan, cidhib- danbeedkooduna wanaagsan yahay. Nafta liidataana waxa ay ku wareegtaa hadba inta xun, wayna ku hoobataa goob kasta oo liidata sida duqsiga oo kale.

Nafaha wanaagsani kuma raalli noqdaan dulmiga xumaanta, dhaca iyo boobka toona; maxaa yeelay way ka han-sarreeyaan oo ka mudan yihiin, halka nafaha liita ee hooseeyaa ay intaa kaso horjeedkeeda tahay, naf walba waxa ay u-iilanaysaa waxa la nooca ah ee ku habboon.[1]

Kolkii ay sidaas oo dhan lagama maarmaan u-noqotay daahirinta/maydhista naftu, waxa waajib ku ah qof kasta oo naftiisa nasteex u-ahi in uu ku dedaalo, kulana jihaado naftiisa gaadhidda yoolkaas wanaagsan; si-uu u-liibaano labada daroodba, uguna raaxaysto guusha dhabta ah. Naftu waxa ay qofka muslimka ah ku leedahay xaq sida uu yidhi Rasuulku NNKH: « Naftaaduna xaq bay kugu leedahay», gef buu ku dhacay qofka u-fahmay in xaqa naftu yahay in lagu ad-adkaado loona diido baahiyihii ILAAHAY ku abuuray SW  sida uu gefkaba ugu dhacay qofka qummanaheeda qoorta u- sudhay, xadhigana u-siidaayey iyada oo dhex dhumbanaysa shahawaadkeeda iyo waxa ay jeceshahay.

---

1: الفوائد لابن القيم ص :(١٧٨)

Fogaa oo dheeraa in ay noqoto daahirinta naftu sidaas, daahirinta/nadiifinta naftu waxa ay ahaanaysaa uun waddooyinkii sharciga, dhex-dhexaysiga iyo in sida qumman lagu taagnaado, ma-jirto ka gaabin [kheyrka laga gaabinayo] iyo ku talax- tag [sharka lagu-talax-tagayo]. Waa raacitaanka waddadii Nebiga SCW iyo jidkiisi qummanaa.

Waxa aan ku sheegi doonaa halkan toban qaacido ama xeer oo muhiim ah, qofka muslimka ahna ku kaalmaynaya daahirinta naftiisa iyo hagaajinteeda, iyo in uu ka nadiifiyo wax kasta oo uskagaynaya/ shaashaynayana.

ILAAHAY waxa aan weydiisanayaa in uu nafaheenna daahiriyo, camalladeena hagaajiyo, hadalladeena toosiyo, xaqa inna tusiyo, innaguna arsaaqo u-hogaansigiisa iyo in uu innagu hanuuniyo akhlaaqda iyo acmaashaba kuwooda wanaagsan, innagana leexiyo wax kasta oo xumaan ah, innaga dheereeyo balaayooyinka kuwooda muuqda iyo kuwa qarsoonba, ha ammaano Nebigiisa Muxammad ahaa naxariis iyo nabad gelyana korkiisa ha yeelo.

# QAACIDADA KOOBAAD

***Tawxiidku waa sawraca/asalka daahirinta nafta.***

Tawxiidku (in ALLE cibaadada loo gaar yeelo) waa ujeeddada uu ILAAHAY inoo abuurayba inoona jirsiiyey, ALLE waxa uu yidhi:

{ وَمَا خَلَقْتُ الْجِنَّ وَالْإِنْسَ إِلَّا لِيَعْبُدُونِ }

**(Jinka iyo Insiga umaan abuurin cibaadadayda mooye wax kale).**

Sida oo kale waa biyo dhaca dacawaddii Ambiyada iyo Rususha, sida uu ALLE-ba yidhi:

{وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَسُولًا أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَاجْتَنِبُوا الطَّاغُوتَ}

**(xaqiiqee, ummad kasta waxa aanu u dirnay rasuul isaga oo faraya in ay ALLAAH caabudaan, kana dheeraadaan cibaada cidda kasoo hadhay oo dhan).**

Tawxiidku waa shayga ugu horreeya ee laga doonayo qofka si uu diinta Islaamka usoo galo, waana- shayga ugu horreeya ee laga doonayo qofka dadka xagga ILAAHAY ugu yeedhaya in uu dadka baro, sida uu Nebiguba ku yidhi Mucaad Ibnu Jabal markii uu u-dirayey Yaman: « waxa aad u tegaysaa dad Ehlu-kitaab ah(Yahuud iyo Nasaaro), ha noqdo waxa ugu horreeya ee aad ugu yeedhaa Tawxiidka oo ah in ay ALLAAH keliyeeyaan». ALLAAH waxa uu ugu gooddiyey cadaab daran maalinta Qiyaame, kuwa aan nafahooda ku daahirinayn Tawxiidka iyo Iimaanka. ALLAAH waxa uu yidhi:

{وَوَيْلٌ لِلْمُشْرِكِينَ * الَّذِينَ لَا يُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُمْ بِالْآخِرَةِ هُمْ كَافِرُونَ}

(**Hoog ayaa u-sugnaaday kuwa mushrikiinta ah. Kuwaas oo aan qiraynin kelmadda tawxiidka, waana kuwo aakhiro ka gaaloobay).**

Ibnu Taymiyya waxa uu ka yidhi tafsiirka aayadda: « waa Tawxiidka iyo Iimaanka ka uu qalbigu ku hagaagayo; waxa uu koobsanayaa in laga diido qalbiga oo laga saaro ILAAH-nimada aan xaqa ahayn, laguna sugo-qalbiga ILAAH-nimada xaqa ah, waana macnaha (Ilaah xaq [lagu caaabudaa] ma jirro ALLE mooye), taasina waa asalka waxa qalbigu ku daahiroobayo.[2]

Ibnu Qayim waxa uu yidhi AHUN: « waxa ay yidhaahdeen badi culimada tafsiirku kuwii hore iyo kuwii danbe: Waa Tawxiidka qiridda Ilaah xaq lagu caabudo in aanu jirin ALLE mooye, iimaanku waa ka uu qalbigu ku hagaagayo ...waana asalka hagaag kasta iyo korodh kasta...».[3]

Sida Tawxiidku u-yahay asalka ay naftu ku hagaagayso kuna dahirmayso, ayaa shirkiguna u- yahay ka ugu adag ee nafta uskagaynaya ee baabiinaya, intaas uun kuma eeka xitaa waa mid acmaasha oo dhan burburinaya, sida uu ALLAAH yidhi:

{وَلَقَدْ أُوحِيَ إِلَيْكَ وَإِلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكَ لَئِنْ أَشْرَكْتَ لَيَحْبَطَنَّ عَمَلُكَ وَلَتَكُونَنَّ مِنَ الْخَاسِرِين}

**(xaqiiqee waxa aanu u-waxyoonnay adiga iyo kuwii kaa horreeyey ba, haddii aad shirki la- timaaddo bure oo waa burayaa camalkaagu, waxa aanad ka mid noqonaysaa kuwa khasaaray).**

---

2: مجموع الفتاوى (١٠/٩٧)

3: إغاثة اللهفان (١/٧٩)

Waana dambiga aanu weligii ALLE dhaafin haddii uu qofku ku dhinto. ALLAAH waxa uu yidhi:

{إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَغۡفِرُ أَن يُشۡرَكَ بِهِۦ وَيَغۡفِرُ مَا دُونَ ذَٰلِكَ لِمَن يَشَآءُۚ وَمَن يُشۡرِكۡ بِٱللَّهِ فَقَدِ ٱفۡتَرَىٰٓ إِثۡمًا عَظِيمًا }

(**ALLE ma dhaafo haddii loo shirki sameeyo, wuu dhaafa wixii intaa ka hooseeya cidda uu doona ayuuna u-dhaafa, ciddii ILAAHAY la wadaajisa cabaadadiisa waxa uu been abuurtay dambi weyn).**

Haddii uu addoonku ka dhabeeyo Tawxiidka waxa u-sugnaanaya daahirin iyo hagaag dhamaystiran, waxa kale oo u-sugnaanaya hanuun iyo nabad gelyo dhammaystiran oo if iyo aakhiraba ah. Sida uu ALLE yidhi:

{ الَّذينَ آمَنوا وَلَم يَلبِسوا إيمانَهُم بِظُلمٍ أُولئِكَ لَهُمُ الأَمنُ وَهُم ...}

(**kuwii Iimaanka la yimid iyaga oo aan ku dheehin dulmi [Gaalnimo] waxa u-sugnaaday amni, iyaga uun baana ah kuwa hanuunsan).**

Mar kasta oo addoonku uu ALLE u-badhax tiro is-dullaynta iyo jaceylka, waxa badhax tirmaysa acmaashiisa wayna ansaxaysaa, naftiisuna way daahiroobaysa oo way wanaagsanaanaysaa, mar kasta oo uu geliyo wax shaashaynaya oo suuska shirkiga kamida, naftiisa waxa uu geliyey xumaan iyo wax liita. Ma- jirto daahirnimo nafeed Tawxiid la'aanteed iyo keliyeynta ALLAAH loo gaar yeelo cibaadada, camalkana loo badhax tirayo sida uu ALLAAH yidhi:

{ أَلَا لِلَّهِ ٱلدِّينُ ٱلۡخَالِصُ }

**(ILAAHAY waxa u- sugnaaday cibaadada badhaxa tiran).**

Mana jirto daahirnimo nafeed mooyaane in laga sifeeyo shirkiga noocyadiisa kala duwan oo dhan, lagana sifeeyo wax kasta oo burinaya tawxiidkii oo taag darreysiinaya.

# QAACIDADA LABAAD

***Ducadu waa furaha nafta lagu daahiriyo.***

Nebigu SCW waxa uu yidhi: «Ma jiro shay ALLE agtiisa kaga sharaf badan ducada». Ducadu waa cibaadaadka kuwooda ugu wanaagsan ILAAHAY agtiisa. Waxa ku sugan muujin la muujinayo taag- darro, iyo in ILAAHAY loo baahan yahay, is-dulleyn, is-bihin-bihin iyo qiritaanka awoodda ALLE SW iyo taagtiisa, hodantinnimadiisa iyo hodmintiisaba, isla weynidiisa, iyo in uu kabo qalbiyada jaban ee cadawayadiisa, is kaba daa awliyadiisa iyo kuwa jecelba”.[4]

Ducadu waxa ay saameyn ku leedahay furitaanka albaabada kheyrka. Sida uu ku sheegay sheekhul Islaam dardaraankii uu u-qoray Abuu Qaasim Al-Maqribi ee ahaa: «Ducadu waa furaha khayrka oo dhan».[5] Khayr kasta oo adduunyo ama mid aakhiro oo aad la doonayso naftaada ALLE weydiiso xaggiisana ula irko si aad u-gaadho oo u-hesho.

ALLAAH SWT waxa uu u-ballan qaaday aqbalka baryada cidda xaggiisa u soo irkata. Waxa uu yidhi:

{وَقَالَ رَبُّكُمُ ادْعُونِي أَسْتَجِبْ لَكُمْ}

**(RABBIGIIN waxa uu yidhi i-barya/Wax i-weydiista waan idinka ajiibayaaye).**

Waxa uu yidhi Amiiru Al mu'miniin Cumar Ibnu Khadaab RC: «Ma qaado oo korkayga ma saaro werwerka aqbalidda ducada; balse waxa i-saaran werwerka baryada. Haddii la i-waafajiyo baryada aqbalkuna waa mid la jirkeeda ahaaday».[6]

---

4: مرقاة المفاتيح شرح مشكاة المصابيح» رقم: ٤/١٥٢٧

5: مجموع الفتاوى (١٠/٦٦١)

6: أخرجه « الترمذي » في جامعه. رقم: (٣٣٧٠)

Mudarraf Ibnu Shikhiir waxa laga soo wariyey in uu yidhi: « waxa aan is weydiiyey maxaa khayrka soo ururinaya illeen khayrku waa faro badan yahaye, [kheyrkiina waxa kamida]: oo ku jira Soon iyo Salaad, waaba kheyrkii oo ku sugan gacanta ILAAHAY–isaga ayaa xumaan ka hufane–adiguna ma tihid mid karaya waxa gacanta ILAAHAY ku jira mooyaane in aad weydiisato Isaga oo uu ku siiyo, kolkaas ducadu waaba iyada oo khayr dhammaantii kulmisay».[7] Waxa ka sugnaaday Nebiga SCW (Baabka daahirinta nafta) in uu ku ducaystay: ALLAHA-yow sii naftayda ALLE ka cabsigaaga, daahiri Adiga ayaa u-wanaagsanaaday cid wax daahirisa' e, adiga ayaa ah gargaaraheeda iyo u- hiiliyaheedaba. Ducada waxa ku sugan tilmaan iyo baraarujin la innoo tilmaamayo in daahirinta naftu ay gacanta RABBI ku jirto SWT, ALLAHA og waxa qarsoon iyo waxa maqanba.

Furaha ugu weynina [daahirinta nafta] waa baryada ILAAHAY iyo in Isaga la isu dhul dhigo. Waxa kale oo uu Nebigu NNKH aad ugu ducaysan jirey: «ALLAHA quluubta gedgaddiyow ku sug qalbigayga diintaada».

Marka uu soo kulmiyo oo uu isu keeno addoonku qalbigiisa, baahidiisa, duruuftiisa ka run sheego, rajadiisu ay xoog badato, aqbalaaddana aanu dedejisan, kuna dedaalo waqtiyada fadliga badan; ducadaasi waa mid aan la celinaynin.
Waxa ugu weyn ee kugu caawin kara la imaatinka ducadu, waa garashada aad garanayso in daahirinta naftaadu ay tahay wax gacanta ALLE kujira.

---

7: أخرجه الإمام أحمد في «الزهد» رقم: (١٣٤٤)

ILAHAY SW cidda uu doono ayaa uu daahiriyaa oo nadiifiyaa, amarka oo dhanna isaga ayaa iska leh doonistiisa waa uu hoos yaallaa. Sida uu ALLAAH yidhi: .

{ بَلِ اللَّهُ يُزَكِّي مَن يَشَاءُ}

Mar kale Alle waxa uu yidhi:

{ وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ مَا زَكَىٰ مِنكُم مِّنْ أَحَدٍ أَبَدًا وَلَٰكِنَّ اللَّهَ يُزَكِّي مَن يَشَاءُ }

**(Haddii aysan jiri lahayn galladda ALLE korkiinna yeelay iyo naxariistiisu —way jirtaaye— daahir ma noqdeen weligiis mid idinka mid ahi; haseyeeshee ALLE ayaa cidda uu doono daahiriya)**

Ibnu Cabbaas RC waxa uu ku tafsiiray aayaddan markii uu fasiraye: (مَا زَكَىٰ مِنكُم): :" Kuma hanuuneen mid makhluuqa ka mid ahi wax naftiisa u-wanaagsan, iskamana dhawreen wax naftiisa khatar ku ah, arrinkaasi dhammaantii waxa uu ku ahaaday uun galladda RABBI. Baraa- RC waxa uu yidhi: Rasuulku SCW waxa uu ahaa maalintii gaashaan buurta ( يوم الأحزاب ) mid ciidda nala guraya, ciidduna ay qarisay caddaankii calooshiisa (timihii calooshiisa ku yaallay ay boodhoobeen) kuna geeraaraya:

والله لولا الله ما اهتدينا ولا تصدَّقنا ولا صلّينا

***"ALLE Ayaan ku dhaartee haddii aanu ALLAAH jiri lahayn;maynu hanuunneen, sadaqo lamabaxneen, mana tukanneen".[8]***

Hanuunka iyo iimaanku gacanta Rabbi ayaa ay ku jiraan dhammaantood. Nebiguna SCW waxa uu ahaa mid arrinkaa ku beera [laabaha] saxaabadiisa, kuna dhid ba si joogto ah.

Rasuulku waxa uu ahaa mid ku iba-fura khudbaddiisa: « Kii uu ILAAHAY hanuuniyo cidina ma baadiyeyn karto, kii uu ALLE

8: ( ٤١٠٤ ) أخرجه البخاري في «صحيحه» رقم :

baadiyeeyana, cidina ma hanuunin karto».[9]

Seeskani waxa uu ka mid yahay qaybaha ugu waaweyn ee daahirinta nafta. Qofka ogaada in hagaagga naftiisa, daahirnimadeeda iyo toosnaanteedu ay gacanta RABBI ku jirto, xaggiisa ayaa uu u-irkadaa, albaabkiisa ayaa uu u-jeestaa isaga oo baryada ku celcelinaya, rajeynaya oo quud-darreynaya gaadhitaanka dahaaro nafeed, guul nafeed iyo liibaanteeda if iyo aakhirab.

9 : أخرجه الإمام مسلم في «صحيحه»، رقم: (868)

# QAACIDADA SADDEXAAD

***Qur'aanku waa isha dahaarada nafta iyo caawiyaheeda***

ILAAHAY waxa uu yidhi:

{لَقَدْ مَنَّ اللَّهُ عَلَى الْمُؤْمِنِينَ إِذْ بَعَثَ فِيهِمْ رَسُولًا مِّنْ أَنفُسِهِمْ يَتْلُو عَلَيْهِمْ آيَاتِهِ وَيُزَكِّيهِمْ وَيُعَلِّمُهُمُ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ}

**(Xaqiiqee, ALLAAH waxa uu ku mannaystay mu'muniinta in uu ka soo dhex saaray Rasuul iyaga ka mid ah, xaal uu ku dul akhrinaayo korkooda aayaadka RABBI kana daahirinayo [Shirkiga], barayana Qur'aanka iyo Sunnada.).**

Waxa ugu weyn ee nafta lagu daahiriyaa waa Qur'aanka sharfan. Qur'aankaas oo ah isha dahaarada, kaalmeeyaheeda iyo meesha ay kasoo fuleyso [dahaaradaasiba]. Kii naftiisa la doonaya daahirnimo haka raadiyo kitaabka ALLE. Ibnu Cabbaas waxa uu yidhi: "ALLE waxa uu u-dammaanad qaaday cidda Qur'aanka raacda, in aanay ifka ku lumaynin, aakhirana ku hoogaynin. Ka dib waxa uu akhriyey:

{فَمَنِ اتَّبَعَ هُدَايَ فَلَا يَضِلُّ وَلَا يَشْقَى}

**(Cidda raacda hanuunkayga,lumi mayso mana hoogi doonto)".** [10]

ILAAHAY waxa uu yidhi:

{يَا أَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَتْكُم مَّوْعِظَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَشِفَاءٌ لِّمَا فِي الصُّدُورِ وَهُدًى وَرَحْمَةٌ لِّلْمُؤْمِنِينَ}

**(Dadyahow waxa idiin yimi waano xagga RABBI-giin ka timid, daawana-u-ah waxa laabaha ku sugnaaday—Jahliga—hanuun iyo naxariis bayna u-ahaatay mu'miniinta).**

---

[10] : أخرجه ابن أبي شيبة في «المصنف» رقم : (٣٥٩٢٦)

Ibnu Qayim waxa uu yidhi: “Qur'aanku caafimaad dhammaystiran ayaa uu u-yahay dhammaan xanuunnada qalbiga iyo kuwa jidhkaba, sida oo kale daawo ayaa uu ka yahay xanuunada ifka -iyo kuwa aakhiraba”.[11]

ALLAAH waxa uu yidhi:

{الَّذِينَ آتَيْنَاهُمُ الْكِتَابَ يَتْلُونَهُ حَقَّ تِلَاوَتِهِ أُولَٰئِكَ يُؤْمِنُونَ بِهِ}

**(Kuwii aannu siinnay kitaabku waxa ay akhriyaan akhrinta uu xaqa u-leeyahay, kuwaasi iyaga ayaa ah kuwa rumeeyey).**

Akhrinta kitaabka laakhrinayo tan uu xaqa u-leeyahay waxa ay noqonaysaa: akhrintiisa, xifdintiisa, fahamkiisa, u-fiirsigiisa iyo ku camal-falkiisaba.

Sidaa waxa ku fasiray saxaabada qaar ka mid ah iyo taabiciintii. Ibnu Mascuud waxa uu yidhi: “Ninka naga midka ahi waxa uu ahaa mid barta Toban aayadood, mana dhaafi jirin ilaa uu barto macnahooda kuna dhaqmo aayaadkaas”.[12] Akhrinta la akhrinayo Qur'aanku iyada oo aan macaaanidiisa la fahansanayn, ama aan lagu dhaqmayn wixii uu la yimid, lagu tirin maayo akhrintii dhammayska tirnayd. sidaas awgeed ayaa uu Fudayl Ibnu Ciyaad AHUN yidhi: “Qur'aanka waxa loo soo dejiyey si loogu camal falo, dadkiina akhrintiisii ayaa ay ka dhigteen camal-fal”.[13]

Haddii uu ALLE ku karaameeyo addoonkiisa akhrinta Qur'aanka iyo u-fiirsigiisa, naftiisana kula jihaado/dedaalo ku camal falkiisa, waxa uu ka gaadhi doonaa daahirinta naftiisa nasiibka iyo qaybta ugu weyn.

---

11: زاد المعاد رقم : (٤/١١٩)

12: أخرجه الإمام أحمد في «المسند» رقم : (٢٣٤٨٢)

13: أخرجه الاجري في اخلاق حملة القران (ص 41)

# QAACIDADA AFRAAD

***Samaysashada hoggaan iyo cid aad ku dayato.***

ALLAAH waxa uu yidhi:

{لَّقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِّمَن كَانَ يَرْجُو اللَّهَ وَالْيَوْمَ الْآخِرَ وَذَكَرَ اللَّهَ كَثِيرًا}

**(Waxa idiinku sugnaaday Rasuulka ILAAHAY ku dayasho wanaagsan, waxa ayna ugu sugnaatay cidda rajeynaysa ALLE iyo maalinta aakhiro, ALLE-na in badan xusaysa).**

Ibnu Kathiir waxa uu yidhi: "Aayaddan wanaagsan waxa ku sugan asal weyn oo ah: Ku dayashada Nebiga SCW xag hadal, fal/ficil, iyo xaaladihiisaba".[14] Xasan al-Basri AHUN ayaa isna yidhi: "Dad ayaa yidhi xilligii Nebiga SCW: Waxa aannu jecel nahay RABBI-gayo, ALLE-na waxa uu soo dejiyey aayaddan:

{قُلْ إِن كُنتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي يُحْبِبْكُمُ اللَّهُ}

**(Waxa aad ku tidhaahdaa: haddii aad ILAAHAY jeceshihiin aniga i-soo raaca, kolkaas ILAAHAY waa idin jeclaanayaa).**[15]

Raacitaanka Rasuulka iyo ku dayashadiisu waxa ay daliil u-tahay runnimada jacaylka ILAAHAY; waayo ku dayashada iyo raacitaanka Nebigu SCW, iyo in lagu tooso dariiqiisii qummanaa ayaaba ah daahirnimada lafteedii, suuro galna maaha in lagu gaadho [Daahirnimadii] kii uu Rasuulku la yimid mid aan ahayn. Waxa ay soo kordhiyaan hoggaamiyayaasha baadilka iyo hallowgu waqti kasta oo ah; waddooyin baadil ah oo la raacayo iyaga oo ku sheegaya in ay nafta daahirinayso, qalbiyada hufayso, xoojinayso xidhiidhka ILAAHAY, iyo kutiri-ku-teenaha kale; sida in ay ku dardaarmaan in laga dhex- baxo dadka oo lagu keliyeysto meelaha madow, lana-

14: تفسير ابن كثير (١١/١٣٣)

15: أخرجه الطبري في «تفسيره» رقم (٦/٣٢٢)

dareeriyo adkaar khaas ah iyo ereyo gaar ah oo ay sheeganayaan in ay daahirinayso, hufayso, rabbaynayso nafaha iyo waxyaabo intaa ka duwani ba dhammaantood waa sheegashooyin baadil ah.
Cilmi badanihii Ibnu Qayim waxa uu yidhi: "Daahirinta nafta ayaa ka culus oo ka adag daweynta jidhka, haddaba ka ku daahiriya naftiisa jimicsiyada, gaar noqoshada iyo hababka aanu la iman Rasuulku SCW waa sida: qof xanuunsanaya oo isku daaweynaya wixii ra'yigiisu la noqday iyo sida ay naftiisu sawiratay. Haddaba intee ayey isu jiraan ra'yigiisa iyo garashada dhakhtarku?

Rasuulladu waa dhakhaatiirta quluubta, mana jirayso waddo aan tooda ahayn iyo dhabbo kale oo lagu hagaajinayo laguna daahirinayo quluubta, keliya waa in si-badhaxtiran la isugu dhiibo iyaga oo loo haggaansamo. ILAAHAY ayaa gargaare iyo kaalmeeyaba ah'e".[16]
Sidoo kale acmaasha dhamaantood wixii aanu Nebigu SCW amrin ama aan ka sugnaanin waa mid lagu celinayo qofkii la yimaadda, sida uu Nebigu SCW yidhi:

« من عمل عملا ليس عليه أمرنا فهو رد »

**(Ruuxa sameeya camal aan arrinkayaga waafaqsanayn waa mid lagu celinayo [Waxaas uu soo kordhiyey]).**[17]

Waxa uu odhanayaa Imaamkii Sufyaan Ibnu Cuyayna AHUN: "Rasuulka ILAAHAY waa miisaanka weynida badan, isaga ayaana loo bandhigayaa shay kasta. Wixii waafaqa akhlaaqdiisi, hab-dhaqankiisi, dariiqiisi, waa xaq; wixii baal maraana waa waxba ka ma jiraan".[18]

16: مدارج السالكين (٢٠/٣٠٠)
17: أخرجه مسلم في «صحيحه» رقم : (١٧١٨ )
18: أخرجه الخطيب في مقدمة كتابه « الجامع لأخلاق الراوي وآداب السامع» (١/٧٩ )

Sidaas daraadeed, waxa waajib ku ah qofka doonaya daahirinta naftiisu in uu kula jihaado raacitaanka iyo kudayashada Nebiga SCW, kana digtoonaado -waxyaabaha lasoo darrisiiyey, la dhoob-dhoobay iyo waddooyinka la samaystay ee ay sheeganayaan kuwii sameeyey in ay nafaha daahirinayso.

# QAACIDADA SHANAAD

*Daahirinta Naftu waa Sifayn iyo Qurxin.*

Daahirinta/Nadiifinta nafta ee dhabta ahi waa: In nafta in laga sifeeyo marka hore waxyaabihii liitey (macaasidii iyo dunuubtii), ka dibna lagu qurxiyo samaynta daacaadka iyo qurubaadka (waxyaabaha ILAAHAY loogu dhowaanayo), sida uu ALLE yidhi:

{خُذْ مِنْ أَمْوَالِهِمْ صَدَقَةً تُطَهِّرُهُمْ وَتُزَكِّيهِم بِهَا وَصَلِّ عَلَيْهِم}

**(Ka-qaad maalkooda Sadaqo ka dahirta wasakhda danbiyadooda munaafaqnimana ka koryeesha. ALLAAH-na u-weydii dembidhaaf).**

Hadalka RABBI yidhi: {تطهرهم }(nadiifinaysa) waxa ku sugan tilmaan la tilmaamayo sifaynta nafta laga sifaynaayo xumaanaha, laga-na daahirinaayo dunuubta. Hadalka uu ALLE yidhi: {تُزَكِّيهِمَ} (daahirinaysaa): Waxa ku sugan tilmaan la tilmaamayo derejada is qurxinta, la-isku qurxinaayo waxyaalaha wanaagsan iyo fadaa'isha. Hormarinta is nadiifinta laga hormariyey is- daahirintu, waxa ay ku tusinaysaa in is-nadiifintu ka horreyso is qurxinta. Waxaa lagama mamaarmaan ah in qofka doonaya daahirinta naftiisu uu ka fuqo ugu horrayn dunuubta qalbiga fasahaadinaysa, kana xijaabaysa nuurka, hanuunka iyo iimaanka. Sida uu yidhi Nebigu N.N.K.H: «Addoonku marka uu ku dhaco gef waxa lagu dhigaa qalbigiisa dhibic madow, haddii uu ka fuqo oo ka astaqfuralaysto, kana tawbad keeno, waa laga tirtiraa qalbigiisa. Haddii uu ku noqdo dhibic kale ayaa lagu dhigaa ilaa ay qalbigiisa ka sare marto oo ay wada daboosho, kaasina waa daxalka ILAAHAY Qur'aankiisa ku sheegay :

{كَلَّاۖ بَلْۜ رَانَ عَلَىٰ قُلُوبِهِم مَّا كَانُوا يَكْسِبُون}

**(Iska dhaaf taase, waxa daboolay qalbiyadooda daxal, sababta waxa ay kasbadeen).**[19]

---

19: أخرجه الترمذي في «الجامع» رقم: (٣٣٣٤)

Intaa dabadeed naftiisa ayaa uu kula jihaadayaa in uu badsado acmaasha wanaagsan ee naftu ku daahirayso, sida uu ALLE yidhi:

{وَالَّذِينَ جَاهَدُوا فِينَا لَنَهْدِيَنَّهُمْ سُبُلَنَاۚ وَإِنَّ اللَّهَ لَمَعَ الْمُحْسِنِين}

(**kuwa u-jihaadaya/ u-dedaalaya jidkayaga (sarreynta diinta ALLE iyo kelmaddiisa) waxa aannu ku hanuuninaynaa dariiqa toosan (Islaamnimada) ALLAAH-na waxa uu la jiraa kuwa wanaagsan).**

Ibnu Taymiya waxa uu yidhi: "Ereyga "Taskiya" asal ahaan waa korodhka, şiyaadada iyo barakada. Waxa kale oo uu meesha ka saaraa sharka iyo belaayada oo uu tirtiraa; sidaas ayaa ay ku noqotay daahirinta naftu mid khayr iyo barako wadata, shar iyo belaayana xijaabaysa".[20]

Ibnu Sicdi waxa uu ka yidhi hadalka RABBI ee ah: { بَلِ اللَّهُ يُزَكِّي مَن يَشَاء} **( ALLE ayaa cidda uu doono daahirinaya):** waa Iimaanka iyo camalka wanaagsan. Waa iska sifaynta akhlaaqda liitada iyo isku qurxinta tilmaamaha wanaagsan. [21]

---

20: مجموع الفتاوى (١٠/٩٧)

21: تيسير الكريم الرحمن» ص (١٨٢)

# QAACIDADA LIXAAD

***Xidhidda daaqadaha ka saaraya nafta dahaarada, kana fogaynaya wanaagga, kuna ridaya meelaha liita.***

Baahi aad u badan ayaa uu u-qabaa addoonku in-uu-iska xidho daaqadaha kharribaya naftiisa, uskagana u-horseedaya, waxa la-innoo yeelay tusaale caddaynaya khatarta ay leedahay dhex muquurashada waxyaabaha diintu ay ku dayacmayso. Waxa ku sugnaa xadiiskii Nebiga N.N.K.H: « ILAAHAY waxa uu tusaale ka yeelay; dariiq toosan oo labada dhinac ku leh laba gidaar / xayndaab, labadaas gidaar waxa ay leeyihiin albaabbo furan, albaabbadaas waxa ku dedan daahyo lagu sii daayey. Kadinka albaabka waxa ku sugan mid yeedhaya oo ku baaqaya; "Dadoow, raaca jidka toosan dhammaantiin oo ha- leexleexannina. Yeedhe kale ayaa ka yeedhaya jidka korkiisa sare, kolka uu doono mid kamid ahi in-uu- furo albaababadaas waxa uu ku odhanayaa: Hooggaaga'e, ha furin haddii aad furto waad gelaysaa oo naftaada kama waabin kartide. *Dariiqaasi waa Islaamnimada, labada gidaar/xayndaab-na waa xuduuddii ILAAHAY, albaabada furanina waa wixii ALLE xaaraantinnimeeyey, yeedhaha taagan jidka afkiisa hore-na waakitaabka ALLE, yeedhaha jidka xagiisa sare ku suganina waa waaniyihii ALLE yeelay qalbiga qofka Muslimka ah».* [22]

Ibnu Rajab waxa uu yidhi: " Kii isaga oo adduunka ku sugan ka baxay dariiqii toosnaa, furayna albaabadii ILAAHAY ka xarrimay ee ku sugnaa gidaarrada/xayndaabka bidixdeeda iyo midigteeda, gudahana u-galay waxyaabihii laga xarrimay iyo waxyaabaha ay naftu jeceshahay ee macaasida ah, [ama waxyaabaha shakiga iyo yaqiin la'aanta u-horseedaya] waxaa dhufsanaysa qofkaas kalbadihii ku-sugnaa jidkaas midigtiisa iyo bidixdiisa hadba intii uu ka galay

22: أخرجه الإمام أحمد في «المسند» رقم : (٩/١٧٩ )

albaabadaa kolkii uu joogay adduunyada, gudaheedana uu ku-dhaadhacay". [23]

ILAAHAY SW waxa uu yidhi:

{قُل لِّلْمُؤْمِنِينَ يَغُضُّوا مِنْ أَبْصَارِهِمْ وَيَحْفَظُوا فُرُوجَهُمْ ۚ ذَٰلِكَ أَزْكَىٰ لَهُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ خَبِيرٌ بِمَا يَصْنَعُونَ}

**(waxa aad ku tidhaahdaa [Nebi Muxammadow] mu'miniintaa: Laaba araggiinna, ilaaliya xubnihiinna taranka, arrinkaas ayaa u-dahaaro badan iyaga, ILAAHAY-na waa u-xog-ogaalsan yahay waxa ay samaynayaan).**

Waxa uu yidhi Abuu Xayaan Al- Andalusi: ( Laabidda aragga ayaa laga hormariyey dhawridda xubinka taranka; maxaa yeelay, eegmadu waa fariintii [kugu riixaysay] Sinada waana sahamiyaha xumaanta, balaayaduna eegmada ayey ku daran tahay kuna badan tahay".[24]

Sheekh Sicdi waxa uu yidhi AHUN: "Qofka dhawra xubinkiisa taranka iyo araggiisaba, waxa uu nadiif ka noqonayaa xumaanta ay ku baaliyoobeen dadka fisqiga ehelka u-ahi, acmaashooduna waxa ay ku daahirtay ka dheeraanshaha wixii laga xarrimay ee loo diidey, kaas oo ahaa mid ay naftu u-hanqal taagto, dhankiisana ay u-janjeedho, qofka shay ALLE dartii uga taga, ALLE waxa uu ugu bedelaa mid ka kheyr badan kii hore". [25]

Sidaas daraadeed, wannaaga qofka muslimka ahi waa ka tegista wax aan dheeftu ugu jirin ee hadal iyo baala-daymood ah.

Ibnu Qayim waxa uu yidhi: «Dembiyada badankoodu waxa ay ka dhashaan hadalka badan iyo eegmada badan, labadooduba waa meelaha ugu waaweyn ee uu shaydaanku ka soo galo qofka. Labadooduba ma daalaan mana caajisaan». [26]

---

23: مجموع رسائل ابن رجب» (١/٢٠٦)

24: البحر المحيط لأبي حيان الأندلسي (٨/٣٣)

25: تيسير الكريم الرحمن» ص (٦٦٠)

26: بدائع الفوائد (٢/٨٢٠)

Waxa habboon in qofku uu noqdo mid garaad badan oo feejigan, ALLE-na ka barya adkaysi/sabir iyo badbaado. Waa in uu gooyaa dhammaan jidadka ku hoggaaminaya naftiisa dayaca iyo darxumada. Hantida ugu weyn ee uu qofku haystaa waa diintiisa, haddii uu lumiyana waxa ku dhacaya khasaare adduun iyo mid aakhiraba, gaar-ahaan waqtigan aynnu ku jirno oo ay dadka fitnadu ugu daadatay sida roobka, oo ay furmeen albaabada shubahaadka iyo shahwaddu, ayna sababtay haysashada iyo la socoshada shabakadaha shubahaadka leh iyo ku xidhnaanta barnaamijyada qalloocan. Dad badan ayey u-horseedeen habow iyo ka weecashada hanuunka. ILAAHAY ayaa aynu bad-qabka weydiisanaynaa.

# QAACIDADA TODDOBAAD

***Xasuusashada geerida iyo la kulanka ILAAHAY.***

ALLAAH waxa uu yidhi:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَلْتَنظُرْ نَفْسٌ مَّا قَدَّمَتْ لِغَدٍ وَاتَّقُوا اللَّهَ إِنَّ اللَّهَ خَبِيرٌ بِمَا تَعْمَلُونَ}

**(Kuwa iimaanka laga heleyow ALLE ka baqa, Naf kastaana ha eegto waxa ay berri u-hormarsatay).**

Nebigu SCW waxa uu yidhi: "Waxa aad badisaan xuska midka mac-macaanka jara"[27] oo uu u la jeedo geerida!

Geeridu waa kala soocaha daartan iyo daarta waaritaanka (aakhiro). Waa kala saaraha waqtiga camalka iyo amminta abaalmarinta (qiyaamaha). Geeridu waa xadka kala teedaya korodhsiga sahayda iyo la kulanka abaalmarinteeda. Geerida dabadeed, majirto towbad iyo dembi dhaaf la dhaafayo xumaanta, mana jirto dheef korodhsi sida uu ALLAAH tilmaamay;

ALLE waxa uu yidhi:

{وَلَيْسَتِ التَّوْبَةُ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ السَّيِّئَاتِ حَتَّىٰ إِذَا حَضَرَ أَحَدَهُمُ الْمَوْتُ}.....

**(Tawbad laga aqbali mayo kuwa joogtaynaya samaynta macaasida; oo aan Rabbigood usoo noqonayn ilaa uu sakaardku qabto, oo uu markaaas uu yidhaahdo: Hadda Ayaa aan toobad keenayaa) Dhab ahaantii waa mid haleeli doona oo la kulmi doona dadka oo dhan shaki la'aan.**

ALLAH waxa uu yidhi:

{ قُلْ إِنَّ الْمَوْتَ الَّذِي تَفِرُّونَ مِنْهُ فَإِنَّهُ مُلَاقِيكُمْ..... }

**(Waxa aad ku tidhaahdaa Nebi Muxammadoow: Geerida aad ka cararaysaan waa mid idinla kulmaysa)**

---

27: أخرجه ابن ماجه رقم (٤٢٥٨) وحسنه الألباني في «الإرواء» (٣/١٤٥)

Mar kale ALLAAH waxa uu yidhi:

{أَيْنَمَا تَكُونُوا يُدْرِكْكُمُ الْمَوْتُ وَلَوْ كُنْتُمْ فِي بُرُوجٍ مُشَيَّدَ}

**(Meel kasta oo aad joogtaan geeridu waa mid idin haleelaysa [Haddii ay ajashiinu gasho] xitaa haddii aad gashaan dhufaysyo adag)**

Geeridu waa mid dadka si-kedis ah ugu timaadda. Waxa uu ALLAAH yidhi: {فَإِذَا جَاءَ أَجَلُهُمْ لَا يَسْتَأْخِرُونَ سَاعَةً وَلَا يَسْتَقْدِمُونَ}

(**Marka ay ammintoodu [waqtigooda dhimashadu] uu yimaaddo, il-biriqsina laga dib dhigi maayo, il- biriqsina laga hormarin mayo)**

Fara badanaa ruux ka baxay gurigiisa isaga oo gaadhigiisa wata, kaddibna la soo celiyey isaga oo kafan lagu sido! Fara badanaa ruux reerkiisi ku yidhi: "Cunto ii sii diyaariya" Kaddib dhintay isaga oo aan dhadhamin. Addoonka in geerida looga sheekeeyo waxaa ugu sugan dheef weyn. Waxaa ku baraarugaya garaadkii mooganaa, waxaa ku soo noolaanaya qalbiyadii dhintay. Sidoo kale, waxa uu addoonku ku toosayaaa in uu soo qaabilo RABBIGIIS, Waxa meeesha ka baxaysa mooganaanta iyo ka jeesiga daacada ALLE.

Waxa uu yidhi Saciid Binu Jubayr: "Haddii qalbigayga uu ka baxo xuska geeridu; waxa aan ka baqayaa in qalbigaygu iga fasahaado". [28]

Addoonku wanaag kama dhex-baxayo inta uu eegayo ee uu hubinayo wixii uu ALLE hortiisa la tegi lahaa geeridiisa kaddib, iyo halka uu masiirkiisu ahaan doono.

Sufyaan Binu Cuyayna AHUN waxa uu ydhi: "Waxa uu yidhi Ibraahim At-taymii: Waxa aan naftayda u- tusaaleeyey iyada oo Jannada ku jirta, cunaysa midhaheedii, ka cabbaysa webiyadeedii, laabtana gelinaysa bikrooyinkii/shabbadihii jannada ku sugnaa (Xuural ceynta). Intaa kaddib, waxa aan haddana u- tusaaleeyey iyada

---

28: أخرجه الإمام أحمد في «الزهد» رقم (٢٢١٠)

oo naarta ku jirta, cunysa Saquumkii naarta ku yaallay, kana cabbaysa dhiiggii iyo dheecaankii ehlu naarka, lana baaxaa-degaysa silsiladaheedii iyo xadhkaheedii adkaa! Kolkaas ayaa aan naftayda ku idhi: naf yahay waa iyama labadaas? Shaygee ayaad doonaysaa?Waxa ay ii gu jawaabtay: "Waxa aan doonayaa in adduunyadii laygu celiyo, si aan camal wanaagsan u- soo shaqaysto! Kolkaas baan ku idhi: " Hadda ayaa aad ku sugan tahay adduunka ee shaqayso". [29]

Waxa kale oo aad naftaada ku tidhaahdaa: "Nafyahay, haddii aan dhinto yaa iga tukan doona[Salaadihii aan dayacay], oo yaa iga soomi doona? Oo yaa ka toobad keeni doona gefafkii iyo ka gaabintii aan ku- dhacay?

29: أخرجه ابن أبي الدنيا في «محاسبة النفس» ص (٢٦)

# QAACIDADA SIDDEEDAAD

***Doorashada fadhiga wanaagsan iyo xulashada saaxiibka fiican.***

ALLAAH waxa uu yidhi: "Nebiyow, ku samir sii naftaada lajirka kuwa ALLE caabudaya gelin horeedka iyo gelinka dambeedkaba, iyaga oo ay ILAAHAY dartii ka tahay, hana ka tallaabin araggaaga, adiga oo doonaya dhaldhalaaka adduunyada, hana adeecin mid aannu qalbigiisa ka yeelnay mid hilmaansan xuskayaga/dikrigayga, hawadiisana raacay arrinkiisuna yahay jawr-fal iyo xad-gudub!".[kahfi]

Waxa uu Sicdi ka yidhi tafsiirka aayaddan: "Aayaddan waxaa ku sugan, in la inna amray in aynnu la saaxiibno dadka wanaagsan, naftana kula dedaalno la jaal noqoshadooda iyo dhex jooggooda, haba- ahaadaan dad sabool ahe. Saaxiibtinimadooda waxaa ku sugan faa'iidooyin aan la soo koobi karin". [30]

Nebiguna SCW waxa uu yidhi: "Qofku waxa uu ku sugan yahay oo haystaa diinta saaxiibkii, hana iska eego midkiin cidda uu la saaxiibayo".[31] Sulaymaan Al-khaddaabi waxa uu ku micneeyey hadalka Nebiga- SCW ee ah "Qofku waxa uu ku sugan yahay diinta saaxiibkii" in aanad la saaxiibin mid aad diintiisa iyo ammaanadiisa raalli ka tahay mooyee cid kale, haddii aad la saaxiibto waxa uu kuu hoggaamin doonaa- diintiisa iyo mad-habkiisa. Diintaadana haku kadsoomin, naftaadana khatar ha gelin oo hala saaxiibin mid aanad raalli ka ahayn diintiisa iyo mad-habkiisa".[32]

Sidaas awgeed, Ibnu Mascuud RC waxa uu odhan jiray "Dadka ku qiimeeya saaxiibbadood, qofna lama saaxiibo qof aan yaab geline".[33]

---

30: تيسير الكريم الرحمن» ص (٥٤٧)

31: أخرجه أبي داؤود في «السنن» رقم : (٤٨٣٣)

32: العزلة ص (٥٦)

33: أخرجه ابن بطة في « الابانة الكبرى» رقم : (٣٧٦)

Nebiguna SCW waxa uu yidhi: "Tusaalaha saaxiibka wanaagsan iyo saaxiibka xuni waxa ay ka kala dhigan yihiin: Sida mid miski(cadar) sida iyo mid laxaamad afuufaya. Ka miskiga sidaa waa in uu kuu hadyadeeyo, ama aad ka iibsato, ama aad ur wanaagsan ka hesho. Midka laxaamadda afuufayaana waa in uu dharka kaa gubo ama aad ur xun ka hesho.[34]

Qaaddi Ciyaad Waxa uu odhanayaa marka uu sharraxayo xadiiskan: "Waxaa ku sugan xadiiska in laga fogaado ku dhex milanka kuwa xun, la fadhiga sharwadayaasha, ehlu bidaca iyo kuwa dadka xanta. Sababta oo ah waxa ay xanuunkooda u-gudbiyaan cidda la fadhiisata. Dheeftuna waxa ay ku jirtaa la fadhiisiga kuwa ehlu kheyrka ah, lagana qaato aqoonta iyo dhaqanka suuban iyo akhlaaqda la mahadiyey". [35]

Ruux kasta waxa saaran in uu la fadhiisto kuwa kheyrka ugu kaalmaynaya; maxaa yeelay waa mid ka mid ah sababaha ugu waaweyn ee nafta lagu daahiriyo laguna hagaajiyo. Sidoo kale, waa in uu iska ilaaliyo kana digtoonaado ku milanka kuwa sharwadayaasha ah iyo la fadhigoodaba; maxaa yeelay waxa ay kaga daran yihiin cudurka cadhada.[36]

---

34: أخرجه البخاري في « صحيحه» رقم: (٥٥٣٤ )

35: إكمال المعلم بفوائد مسلم (٨/١٠٨)

36: Cudurada halista ah uun baa loo jeedaa **(Tarjamaaga)**

# QAACIDADA SAGAALAAD

*Ka digtoonaanta is-cajabinta iyo ku kadsoomidda Nafta.*

ALLAAH waxa uu yidhi { فَلَا تُزَكُّوا أَنفُسَكُمْ ۖ هُوَ أَعْلَمُ بِمَنِ اتَّقَى }

**( Naftiina ha ku ammaanina ALLE ka cabsi, ALLAAH ayaa og cidda ka cabsata)**

ALLE waa reebay in qofku uu naftiisa ku ammaano wax tilmaamaya daahirnimadeeda iyo wanaaggeeda; maxaa yeelay, cabsida RABBI deegaankeedu waa kasha/qalbiga, ALLE oo keliya ayaana og cidda ay ka dhab tahay ee ay u-hirgashay cabsidu. Sidoo kale, ammaanidda naftu waxay sabab u-noqon kartaa in uu qofku is-cajabiyo ama uu isu bogo, waxa ayna sabab u-noqon kartaa istusnimo camalkiisa burisa.

Qofka Mu'minka ahi, si kasta oo uu ugu dedaalo sameynta wanaagga iyo ka fogaanshaha xumaanta, wuxuu weli ahaanayaa mid ka gaabinaya xaqii ALLE, naftiisana dulminaya. Haddii Abuu Bakar, run- lawgii ummaddan iyo kan dadka ugu khayrka badan Nabiyada kaddib, markii uu Nabiga SCW weydiiyey in uu baro duco uu ALLAAH ku baryo salaadda dhexdeeda, nebigu SCW waxa uu baray in uu yiraahdo: "ILAAHAYOW, waxa aan dulmiyey naftayda dulmi badan, mana jirto cid dembiyada dhaafta oo aan adiga- ahayn, ii-dhaaf dhaafi taan xaggaaga ka ahaaday, oo ii-naxariiso, Adiga ayaa ah dhaafaha naxariista Badan".[37]

Haddaba, muxuu noqonayaa xaalka cidda isaga ka soo hadhay? Markii ay hooyadeen Caa'ishi RC weydiisay nebiga ujeddada aayaddan:

{ والَّذِينَ يُؤْتُونَ مَآءَاتَوا وَّقُلُوبُهُمْ وَجِلَةٌ أَنَّهُمْ إِلَىٰ رَبِّهِمْ رَاجِعُونَ }

**(Iyo kuwa bixinaya wixii ALLE siiyey oo sadaqadaysanaya, iyada oo quluubtooduna ay ka cabsanayso in laga aqbali waayo acmaasha ay samaynayaan, iyo in aysan ka badbaadin cadaabka RABBI-good**

---

37: أخرجه البخاري برقم: (٨٣٤)

**markay xisaabin ugu laabtaan)**

waxa ay tidhi: Ma kuwa khamriga cabba ee wax xada baa? Waxa uu nabigu SCW ugu war-celiyey: "Maya Ina Saddiiqeey, laakiin waa kuwa sooma, salaadda tukada, sadaqadda bixiya, kana baqa in laga aqbali waayo".[38]

Cabdullaahi Binu Abii Mulayka waxa uu yidhi: "Waxa aan la kulmay in ka badan soddon saxaabi, dhammaantood waxa ay nafahooda uga baqayeen uur-ku-gaalnimo (munaafaqnimo".[39]

Xasan Al-Basri waxa uu yidhi: Mu'minku waxa uu kulansaday samo-fal iyo cabsida ALLE, munaafaquna waxa uu isku daray xumaan iyo amni [Uu cadaabka ALLE ka aamin noqday].[40]

Intaa ka dib Xasan waxa uu akhriyay:

{ إِنَّ الَّذِينَ هُمْ مِنْ خَشْيَةِ رَبِّهِمْ مُشْفِقُونَ. }

---

38: أخرجه الترمذي في «الجامع» رقم: (٣١٧٥) وصححه الألباني في «الصحيحه»

39: أخرجه البخاري في «صحيحه» تعليقا مجزوما به، قبل رقم: (٨٣٤)

40: أخرجه الطبري في «تفسيره» (١٧/٦٨)

# QAACIDADA TOBNAAD

***Aqoonsiga Nafta***

Garashada xaqiiqada nafta, sifooyinkeeda, daryeelkeeda, iyo ka daawaynta xanuunnada ku dhaca waa arrin lama huraan u ah qofka raba inuu naftiisa nadiifiyo (Tazkiyah).
ALLAH (SWT) wuxuu Kitaabkiisa Kariimka ah ku sifeeyey nafta saddex sifo oo caan ah, kuwaas oo tilmaamaya xaaladaha ay naftu marto:

## 1. Nafta Deggan (An-Nafs Al-Mutma'innah)

Waa nafta ku qanacday iimaanka, xusidda ALLE, caabudiddiisa, iyo u soo laabashada xaggiisa. ALLE kor ahaaye wuxuu yidhi:

{الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُّ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللَّهِ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ}

**(Ee ah Kuwa rumeeyey xaqa kuna xasishay qalbiyadoodu xusidda ALLE; ogaada xusidda ALLE uun baa qalbiyadu ku xasillaane.)**

Wuxuu na yidhi isagoo u yeedhaya nafta noocan ah:

{يَا أَيَّتُهَا النَّفْسُ الْمُطْمَئِنَّةُ * ارْجِعِي إِلَى رَبِّكِ رَاضِيَةً مَرْضِيَّةً * فَادْخُلِي فِي عِبَادِي * وَادْخُلِي جَنَّتِي }

(**Nafta degganeey! U laabo Rabbigaa adoo raalli ah, lagaana raalli yahay. Ku dhex gal addoomadayda (wanaagsan), galna Jannadayda.)**

## 2. Nafta Is-eedaasha (An-Nafs Al-Lawwamah)

Waa nafta qofka ku canaanata markuu gef galo, ama ku dhaleecaysa gudasho la'aanta waajibaadka iyo daciifnimada dhanka dacwada ah. ALLE wuxuu yidhi:

{وَلَا أُقْسِمُ بِالنَّفْسِ اللَّوَّامَةِ}

**(Waan ku dhaartay nafta is-eedaasha (ee is canaanata).**

**3. Nafta Xumaanta Amarta (An-Nafs Al-Ammarah bis-Su')**

Waa nafta qofka ku dhiirigelisa samaynta xumaanta, dunuubta, iyo raacidda rabitaanka qalloocan. Sida ku timid suuradda Yuusuf:

{وَمَا أُبرِئُ نَفْسِي إِنَّ النَّفْسَ لَأَمَّارَةٌ بِالسُّوءِ إِلَّا مَا رَحِمَ رَبِّي}

**(Naftayda ma bariyeelayo (ma dambi la'aysiiyo), naftu waxay aad u amartaa xumaanta, marka laga reebo midka Rabbigay u naxariisto.)**

Saddexdan sifo dhab ahaantii waa xaalado kala duwan oo nafta ku yimaada; qofku wuxuu dhex degaa xaaladahan isbedbeddelaya maalin gudaheed. Culimadu waxay u soo qaateen tusaalooyin si loo fahmo oo loola macaamilo hagaajinteeda iyo toosinteeda.

Halkan waxa aynu kusoo gaabsan doonna labo tusaale oo ay labo Imaam oo waaweyni kala bixiyeen.

**Tusaalaha Koowaad: Imaam Al-Aajurri**

Imaam Al-Aajurri waxa uu ku tusaaleeyey kitaabkiisa "Aadaabta Nafaha" waxa uuna yidhi: "Waxa aan kuugu metelayaa -Nafta- tusaale arrinkiisu aanu kaa qarsoomayn InshaALLAH, Naftu waxay u dhowdahay dhal (faras yar) oo qurux badan, oo qofkii eegaa uu la cajabayo. Laakiin dadka aqoonta u leh waxay leeyihiin: Faraskan faa'iido ma yeelanayo ilaa si wanaagsan loo carbiyo, la baro asluubta, laguna tababaro tartanka iyo cararka. Haddii faraskaas la tababaro, waxa uu noqonayaa mid tartanka ku guuleysta, qofka fuulana uu ku faano. Haddii aan la tababarin, quruxdiisa iyo orodkiisu faa'iido ma leh, waana mid laga qoomameeyo kolka baahi loo yeesho.

Haddii uu aqbalo qofka faraskan yar lihi talada dadkaas aqoonyahanka ah, sidaana uu ku qaato, dabadeed uu u geeyo tabatabare. Tababarahaasi dhawr xaaladood mid uun buu noqonayaa:

* Haddii uu leeyahay aqoonta tababarka iyo adkaysi uu ugu sabro tababarka faraskaas: Isaga iyo faraskuba waa ay guulaysanayaan.
* Haddii uu is yidhaahdo tababar isaga oo aan aqoon u lahayn, garanayna dhaqanka fardaha: Faraskaas wuu xumaynayaa, naftiisana wuu daalinayaa qofkaasi.
* Haddii uu aqoon leeyahay laakiin uusan samir lahayn: oo uu ka cagajiido dhibka tababarka, kana gaabiyaa wixii ay ahayd in uu faraska ku tababaro, faraskaasi wuxuu noqonayaa mid aan faa'iido lahayn, dantii iyo ujeedkii laga lahaana aan laga gaadhin sidaana ku qarribma.

Haddii ba uu ahaa tababaruhu kan iska leh faraska, waxa uu noqdaa mid aad uga tiiraanyooda waxaa uu falay xilli aanay waxba tarayn; kolka uu jalleeco asaagii oo iyagu ku intifaacay fardahoodi xilligii ay u baahdeenna uu baahi tirey, waxaas oo dhani waxa ay ku dhaceen is-dhigashadiisa iyo sabir yaraantiisa.

Kaddib waxa uu u soo jeesanayaa naftiisa isagoo canaananaya, (isaga oo leh): (Maxaad u xadgudubtay? Maxaad u gaabisay? Waxaa dhab ahaan igu soo noqday dhib kasta oo aan kahanayey samir la'aanteyda darteed).

Garaad u yeesha —Alle ha idiin naxariistee— barashada tusaalahan, oo si fiican u dhex gala oo u fahma; waxaad noqonaysaan kuwo liibaana oo guulaysta."[41]

**Tusaalahan koowaad** waxa uu ku caddeynayaa Imaam Al-Aajuri —Alle ha u naxariistee— xaaladda nafta bini-aadamka, iyo inay la mid tahay **faras yar** oo u baahan tababar iyo samir lagu asluubeeyo. Iyo in qofku uu ahaado mid cilmi u leh arrimaha lagu hagaajiyo nafta laguna daahiriyo. Sidoo kale, qofku haddii uu ka gaabiyo aqoontan iyo tababarkan, uu

---

41: ادب النفوس للاجري ص (261 )

aakhirka ka shallayn doono qoomamo weyn.

## Tusaalaha Labaad: Imaam Ibn Al-Qayyim

Imaam Ibn Al-Qayyim waxa uu yidhi: "Naftu waa buur weyn oo dhib badan oo hortaala qofka u socda xaggii RABBI (SWT). Qof kasta oo socdaal ah waa inuu buurtaas kor u fuulaa si uu u gaadho halka uu rabo. Laakin dadkaas waxa ka mid ah kuwa ay ku adag tahay (buurtaas fuulisteedu), iyo kuwa ay u fududahay, waxaana ay u fududahay qofka uu Alle u fududeeyo.

Buurtaas dhexdeeda waxaa ku yaalla dooxooyin, qarar, jid-gooyooyin, meelo hoose oo khatar ah, qodax, geedo yaryar oo isku murgay, iyo tuug jidka u fadhiisata socotada, gaar ahaan dadka socdaala habeenkii (dadka cibaadaysta xilliga dadku hurdo). Haddii aysan wadan agabkii iimaanka, iyo laambadihii yaqiinta (hubaasha) oo lagu shiday saliidda khushuucda, waxaa hubaal ah inay ku dhegi doonaan caqabadahaas, waxaana qabsan doona kuwa jid-gooyada ugu jira, kuwaas oo kala dhex geli doona iyaga iyo socdaalkooda. Maxaa yeelay, inta badan dadka jidkaas maraya dib ayay ugu laabtaan cidhibtoodii (dib ayay u gurtaan) markay tabar u waayaan inay gooyaan (ka gudbaan) buurtaas iyo inay u dhabar-adaygaan fuulidda qararkeeda.

Shaydaankuna waxa uu taagan yahay meesha ugu sarraysa ee buurtaas, waxa uuna dadka uga digayaa koritaankeeda iyo dhererkeeda, isaga oo ka cabsi gelinaya: markaas ayaa waxaa qofka isu raacaya: dhibka fuulidda, cabsi geliyaha jooga meesha ugu sarraysa ee cabsida leh, go'aankii qofka socday iyo niyaddiisii oo daciifta; halkaas waxaa ka dhasha inuu go'o (hagaasnaado) oo uu dib u laabto, qofka badbaadayna waa qofka uu Alle ilaaliyo. Mar kasta oo uu qofka socotada ahi kor u sii fanto buurtaas, waxaa ku sii xoogaysata qaylada ka jidgoyada ugu jira (Shaydaanka), isaga oo u digaya kuna cabsi gelinaya. Laakiin markuu

gooyo (ka gudbo) oo uu gaadho dusha ugu sarraysa, cabsidaas oo dhammi waxa ay isu beddeshaa nabad. Markaas ayuu u fududaadaa socdaalku, waxaana ka fogaanaya caqabadihii waddada iyo dhibkii qararkeedii. Waxa uu arki doonaa waddo ballaadhan oo ammaan ah, oo u horseedaysa goobihii degitaanka iyo ilahii biyaha, isaga oo arki doona calaamado (tilmaamaya jidka), halkaas oo ay ku diyaarsan yihiin degaannadii loogu talagalay kooxda 'Raxmaanka'.

Addonka iyo  farxadda waxaa u dhexeeya: Go'aan adag (Cazmi), samir saacad ah, geesinnimo naf ahaaneed, iyo sugnaan qalbi. Fadliguna waxa uu ku jiraa gacanta Alle, waxa uuna siiyaa qofkii uu doono, Allena waa ka fadliga weyn leh."[42]

Tusaalahan waxa uu noo caddeynayaa in xaaladda naftu ay sidoo kale u baahan tahay in qofka iska leh uu daryeelo, daaweeyo, oo uu u samro. Haddii uusan kula tacaalin (nafta) jidka sharciga ah, oo uusan ku samrin arrinkaas, naftu way ka baxsanaysaa (way dhumaysaa) qofkana way luminaysaa.

---

42: مدارج السالكين لابن القيم( 2\10 )

# GUNTII IYO GEBAGEBADII

Kadib markii la soo bandhigay qawaaciddan kor ku xusan ee ka caawinaya addoonka in uu naftiisa daahiriyo, waxaa si cad u-muuqata baahida loo qabo in nafta la xisaabiyo inta ay ku sugan tahay daarta-kanshada[43] iyo shaqada, ka hor inta aanu qofku istaagin ILAAHAY hortiisa maalinta Qiyaame, isaga oo dayacay hagaajinta naftiisa, T aasina ay sabab u-noqoto halaaggiisa.

Selefkii wanaagsanaa waxa ay dadka xusuusin jireen oo kula talin jireen baahida loo qabo in nafta la- xisaabiyo oo la hagaajiyo, ka hor inta aanay dhammaan kanshadu geeriduna aanay iman. Waxaa wanaagsan in gebagebada dhambaalkan la soo guuriyo qaar ka mid ah dar-daarannadii ka soo arooray selefka ee ku saabsanaa baabkan, Waxaana ugu mudan khulafadii afarta ahayd ee hanuunsanayd.

Khaliifkii hanuunsanaa ee Abu Bakr Al-Saddiiq RC ayaa yidhi: "Ogaada addoommadii ILAAHAYOW, in aad ku jirtaan jarmaado iyo carraabo idinka oo ku gudo jira muddo cayiman oo uu idinka qarsoon yahay ogaalkeedu, haddii aad awooddaan in cumrigiinu dhammaado idinkoo ku sugan cibaadada ALLE, sidaas sameeya, mana awoodi doontaan kaalmada ALLE la'aanteed. Kheyrka u- tartama inta geeridu idin ka maqan tahay, haddii kale waxa la idiin celin xagga ALLE idinka oo ku sugan Xaalad liidata…".[44]

Waxa uu yidhi Khaliifkii labaad Cumar Binu Khaddaab RC "Xisaabiya nafihiinna inta aan la idin xisaabin, miisaama nafihiinna inta aan la idin miisaamin, oo u-diyaar garoowa bandhigga weyn iyo maalinta la idiin bandhigaayo, wax idin ka qarsoomayaana uusan

---

43: Kansho: Jaanis/Fursad/Firaaqo. **(Tarjamaaga).**

44: أخرجه ابن أبي شيبة في «المصنف» رقم: (٣٥٥٧٢)

jirin".[45]

Khaliifkii saddexaad Cismaan binu Caafan RC waxa uu yidhi: "Ina aadanow, ogow in uu Malakul- mawtkii laguu xilsaaray uu weli kaa beddel qaadanayo oo uu dafayo qayrkaa adiga oo dunida jooga, sidii isaga oo dadka kale kuu waydaartay ka dibna xaggaaga u-soo kicitimay, iska jir oo u-diyaargarow, hana ka mooganaanin sababtoo ah; isba kaama moogana. Ogow ina aadanow, haddii aad naftaada ka mooganaato oo aanad diyaarin, cid kale oo naftaada diyaarinaysaa ma jirto. Waana hubaal la kulanka ALLAAH SW, kolkaa naftaada hano, cid kalena ha-u-talo saarannin oo haka sugin in ay kuu diyaariso".[46]

Khaliifkii afraad ee Cali binu Abii Daalib waxa uu yidhi: "Dadyahow, waxa ugu daran ee aan idiinka cabsi qabaa waa rejada dheer iyo raacidda hawada. Rejada dheeri waxa ay ku illowsiisaa aakhiro. Raacidda hawaduna waxa ay kuu horseeddaa ka lumista xaq.

Ogaada in ay dunidu jeedsatay, aakhirana ay ina soo qaabishay, mid kastaana waxa u-sugnaaday dhallin yaro, noqda dhallinta aakhiro. Ha noqonnina ubadka adduunyadu leedahay ee u-shaqeeya, sababtoo ah maanta waa maalin shaqo oo ma jirto xisaabi, berrina waa xisaab oo ma jirto shaqo".[47]

Xasan Al-Basri waxa uu yidhi: "Mu'minku waa mid naftiisa u-taagan, naftiisa ayuu xisaabiyaa; Xisaabtuna waxa ay u-fududaataa maalinta Qiyaame duulkii nafahooda ku xisaabin jirey adduunyada. Xisaabtuna waxa ay dhibtaa maalinta aakhiro duulkii aan nafahooda xisaabin jirin".[48]

---

45: أخرجه ابن أبي شيبة في «المصنف» رقم: (٣٥٦٠٠)

46: أخرجه ابو بكر الدينوري في «المجالس والجواهر» رقم: (٢٠٧)

47: أخرجه البخاري في «صحيحه» تعليقا مجزوما به، قبل رقم : (٦٤١٧)

48: أخرجه ابن مبارك في «الزهد» رقم : (٣٠٧)

Maymuun Bin Mehraan ayaa yidhi: “Addoonku ma noqon karo mid taqi ah( ALLE ka cabsada) ilaa uu- naftiisa u-xisaabiyo si ka daran sida uu ula xisaab tamo qofka ay hanti-wadaagga yihiin”.[49]

Sidaa daraadeed Waxaa la yidhi: “Naftu waa sida hanti-wadaage khiyaano badan, oo haddii aanad la- xisaabtamin waxa uu la tegi doonaa xoolahaaga”.[50]

Waxaa sii xoojinaya oo xaqiiqo ka dhigaya hadalkaas ammintan aynnu ku jirno, oo ay faraha ka baxeen fitanka iyo waxyaabaha wanaagga qofka ka jeedinaya, oo ay bateen sharka nafta u-qurxinaya xumaanta ee u-dhaldhalaalinaya.

Imaam Cabdullaahi Binu Mubaarak oo ka mid ahaa culimadii waaweynayd ee Tabiciinta isaga oo ka- hadlaya waqtigiisi waxa uu yidhi: “Saalixiintii iyo dadkii wanaagsanaa waqtigoodii nafahoodu waxay ay kheyrka ula imaan jireen si-fudud, laakiin nafaheennu maanta kuma dhowa in ay innoola yimaaddaan khayrka ilaa aan ku khasabno, aynu nafaheenna ku khasabno sameynta kherka”.[51]

Haddaba, waa sidee xaalka waqtigan aynu noolnahay?

ALLAAH SW ayeynu ku baryeynnaa magacyadiisa wanaagsan iyo sifooyinkiisa sarreeya in uu inoo- hagaajiyo ku dhaqanka diinteenna oo ah ta aynu ku badbaadayno, inoo hagaajiyo dunidan aynu ku nool nahay iyo aakhiradeenna oo ah tan aan ku laabanaynno, in uu inoo siyaadiyo nolosha wax kasta oo khayr ah, geeridana aan kaga raaxaysanno wax kasta oo shar ah.

---

49: أخرجه وكيع في «الزهد» رقم: (٢٣٩)

50: أنظر «إغاثة اللهفان» لابن القيم : (١/١٣٣)

51: أخرجه ابن الجوزي في «ذم الهوى» ص: (٤٧ )

ILAAHAYOW, ugu deeq nafahayaga cabsidaada, oo daahiri Adiga ayaa ugu khayr badan cid daahirisa e, adiga ayaa ah gargaarahayaga iyo waligayagaba. ALLE ha ammaano Nebigeennii Muxammed ahaa, isaga, ehelkiisi iyo saxaabadiisii ba, nabad gelyana korkooda ha yeelo.